



### Xeerarka nidaamka ee iskuulka Holmlia

Degmada Oslo waxa ay soo saartay xeer-nidaamyo ay iskuullada degmada oo dhammi ku dhaqmaan. Dugsiga Holmlia sida iskuullada kale la mida ayuu xeer-nidaamyadan ugu dhaqmaa. Dugsiga Holmlia waxa uu leeyahay xeerar-nidaam oo isaga u gaar ah iyo xeerer-nidaam oo khuseeya fasallada.

Xeer-nidaamyadani waxa ay khuseeyaan marka uu iskuulku ardayda ka mas'ulka yahay sida jidka iskuulka iyo meelaha ka baxsan agagaarka dugsiga. Xeerarkani waxa kale oo ay khuseeyaan marka ay ardaydu ku jiraan waqtigooda firaaqada haddii ay markaa ku gudo jiraan wax saamayn ku yeelanayaa nolol-maal moodkooda iskuulka. Sida dhibaatada/waxyeellooyinka laysu mariyo internetka.

Haddaad tahay arday dhigta iskuulka Holmlia waxaa lagaa sugayaa in:

- Aad edaab iyo xushmad/ixtiraam kula dhaqanto ardayda iyo shaqaalaha
- Aad timaaddo iskuulka waqtiga loogu talagalay, sabab la'aanna aanad u maqnaan
- Xiisadaha dhammaan ay kuu dhamaystirnaadaan qalabkaaga iskuulku, casharrada/shaquo-gurigana aad soo samayso watiga loogu talagalay.
- Aadan ku ciyaarin hantida iskuulka.
- Aanad dhibaatooyin iyo waxyeellooyin kale toona la iman
- Aad si ixtiraam leh ula dhaqanto arayda kale waqtiga biririfta/bareegga. Aanadna samayn ciyaarahaa khatarta ah sida baraf isku tuur-tuurista, kubbadda/ballooniga iyo baaskeeladda nooca (sparkesykkel)ka
- Aanad hanjabaad iyo dagaal midna u gaysan ardayda iyo dadka kaleba
- Aadan haysan waxyaabo khatar ah oo wax dhaawici kara

Qofkii jebiya xeerarkan wuxuu iskuulku ka qaadi karaa tallaabooyin kala duwan sida xeerarka nidaamka ee dugsiyada Oslo tilmaamayo. Iskuulkuna wuxuun leeyahay habab u gooniya oo uu wax uga qabto jebinta xeerarkan sida:

- In ardaygu yimaaddo dugsiga waqtii ka horreeya waqtiga caadiga ah ee iskuulka
- In ardaygu waco waalidkii
- In ardaygu qaato biririfta/bereegga waqtii gaara ama qof la raaciyo

### Xeerarka nidaamka fasalka ee iskuulka Holmlia



Waxaan kaa sugaynaa waqtiga waxbarashadu ka socoto iskuulka in:

- Aadan xiisadaha ka soo daahin
- Aadan qasin/rabshadayn waxbarashada
- Aad istaagto marka macallinku fasalka soo galo si aad u salaantaan
- Aadan fasalka ka bixin fasax la'aan
- Aad madax-saarka iska qaaddo intaanad fasalka gelin haddaantu diintaada ku saabsanayn
- Inta xiisaddu socoto aad mobilka damisid oo ku riddo boorada. Iskuulku kama mas'uul aha magdhowga wixii alaab iskuulka kaaga luma.
- Aanad wax cunin, wax cabbin, muusigna aanad dhegaysan inta xiisadaha lagu jiro, haddii aanu macallinku si gooni ah kuugu fasixin.